# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 0964
# THE EPISTLE OF HEBREW 6:10-18

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **'Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaannu caaway idiin sii wadi doonnaa cutubka lixaad ee warqaddii Cibraaniyada loo qoray, waxaana cutubkan ku jira aayad turjumadeedu ay aad u dhib badan tahay inta kitaabka Qodduuska ah ku jirta sidaad habeenkii noogu dambaysayba maqasheen.

**SONG: REEL---CUT---**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay faalladii ditoor J P Rowel uu ka bixiyey qidcada ku qoran Warqadda Cibraaniyada 6:4-9. Waa qidco siyaabo kala duwan ay mufasiriintu u qaataan, waxaanan u garannay siyaabo habboon oo ah, sidii ditoor J P Rowel inoogu fasiray oo ah kuwan badbaaday, ee haddana xajin waayey badbaadadooda

inay yihiin kuwo intay Masiixa u yimaadaan haddana ka doorta sharciyo iyo xeer diimeedyo.

Waa kuwa dib-u-gurashadooda awgii aan lahayn kororsiimo xagga Ruuxa ah oo noloshooda ka muuqata, waa kuwo uu la horay rumaysadkii hore oo ay aaminsanaayeen, oo noloshooda u keenay dhib iyo rafaad. Waxaa loo baahan yahay in qofku horumar xoog leh ka gaaro noloshiisa masiixinnimo maaddaama uu iftiinka nolosha ku socdo. Waxaana dabdeed qofku uu soo hor istaagayaa Masiixa, waxaana dadka oo dhan ka xisaab qaadanaya Masiixa iyadoo la miisaamayo hawshiisa, waxaana wixii uu sameeyey la dhex marinayaa dab ololkiis. Haddii shaqada qofku ay noqoto al-waax ama bal ama caws waxaad dhegaystayaal dhammaantiin garanaysaan baan filayaa sida cawska qalalan iyo dabka aan laysugu soo dhowayn.

Markii hawshiinna la miisaamo waxaa la doonayaa inay noqoto dahab si xitaa haddii dab la dhex marsiiyo ayan isku beddelin. Haddaan markaasi qidcadii dooddu ka taagnayd dib ugu noqonno ayaa waxaa ku qoran warqaddii Cibraaniyada cutubka 6:6 sidatan:

“Ma suurtowdo in loo cusboonaysiiyo toobadkeenidda,.” Maxay haddaba u suuroobaynin in mar kale iyaga la cusboonaysiiyo oo ay toobadkeenaan? Haddaba waxaad xusuusataa in laga hadlayo miraha badbaadada, laakiin aan laga hadlaynin badbaadada ama nabaadiinada. Haddaba waa wax khatar ah in Masiixa loo aqoonsado sida inuu yahay badbaadiyaheenna haddana aynu dembi ku sii soconno, dabeetana la noqdo qof aan xagga ruuxa ka korin, oo hawshiisuna ay tahay inuu ururusado xaabo bal iyo caws, oo markii la tijaabiyana

shaqadiisa oo dhan ay gubanayso. Waxaa la doonayaa in aasaaska noloshayada oo ah Masiixa in sarajooggeeda la dheereeyo, ama haddaan idiin jilciyo in noloshayada masiixinnimo ee aynu masiixa awgii ku helnay sare loo qaado.

Waana in ay yeelato kororsiimo, laakiin ayan naaqus noqonin. Rasuul Bawlos oo ka hadlaya arrinkaas ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii I aad ee reer Korintos 3:11, sidatan: **"Waayo ninna ma dhigi karo aasaas kale, kan la dhigay mooyaane, oo ah Ciise Masiix."** Marka ay sidan tahay, waxaannu arkaynaa in aasaaska oo ah badbaadadeenna uu yahay Masiixa. Qidcadanna looga hadli maayo badbaadada, laakiin waxaa looga hadlayaa sare-u-qaadidda nolosha masiixinnimo iyo inay noloshayadu yeelato kororsiimo, laakiin ma ahan waxa la waayayo nabaadiinadii laynagu siiyey rumaysadka Sayid Ciise Masiix.

Haddaba waxaad rumaysadkaaga sare ugu qaadi kartaa ama ku dhisi kartaa lix waxyaabood, waxaanay kala yihiin, xaabo, bal, caws, dahab, qalin iyo luul. Haddaba dhegaystow maxaad noloshaada masiixinnimo ku dhisaysaa? Ma waxaad ku dhisaysaa xaabo, mise bal mise caws. Wax kastoo aad samayso ayaa ku sugaya qiyaamaha, waa marka laga hor muuqanayo carshiga xukuumadda ee Ciise Masiix.

Waxaa horumaraya wehelnimada, oo xoogaynaysa ama adkaynaysa in dadka la baro Hadallada Ilaah. Markaa oo keliya ayaa waxaa jiraya kororsiimo aasaaskeedu yahay Masiixa. Waxaannu garanaynaa sida ololku u gubo xaabada, cawka iyo balka, shuqulkii aan Masiixa lagu samayninna waa la mid. Masiixa ayaa wuxuu inoo sheegayaa in isagu uu yahay geedka Canabka, innaguna aynu nahay

laamihii. Haddii markaasi Masiixa aynaan ku salaynin noqon kari mayno laamaha, waxaannu laamaha geedka canabka ku noqonaynaa haddii aasaaskeennu yahay Hadallada Ilaah. Waa inaynu ka miradhalinnaa nolosha Masiixinnimo isla sida Masiixaba inoo sheegayo sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 15:7-8, markaasoo Masiixu uu leeyahay:

**"Haddaad igu jirtaan oo ay erayadayduna idinku jiraan, weyddiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa. Waxaa aabbahay uu ku ammaanmaa inaad miro badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda."**

Waxaa Masiixu uu inaga doonayaa inaynu miro dhalinno, oo in miro la dhaliyaana waa in la lahaado shuqul wanaagsan, taasina waxaa weeye inaan ka soocnaanno dadka kale, oo ficillada iyo hawsha uu Masiixa inaga dhex samaynayo ay kuwo badan ku hoggaamiso waddada nabadda iyo hanuunka. Waa inaynu Masiixa markhaatiyaal wanaagsan uga ahaanno dunida, haddiise laynaga waayo taas, waxaa Masiixu leeyahay sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 15:6 oo leh sidatan:

**"Qof hadduusan igu jirin, waxaa loo tuuraa sida laan oo kale, waana qalalaa, markaasaa la aruuriyaa oo dabkaa lagu tuuraa oo la gubaa."**

Waxaa qofkii laga goynayaa geedkii, oo mirodhalistiisuna way joogsanaysaa. Waxaan arkay dad kala duwan oo qaarkood ay ku mashquulsan yihiin hawl aan waxtar lahayn iyo kuwo ku hawlanaa hawl waxtar leh, oo aasaaskood masiixinnimo ka dul dhisay dahab saafi ah, mid walibana waxaa abaalkiisu noqday sidii shuqulkiisu ahaa. Markaana way ahmiyad ballaaran tahay inaynu ka taxaddarno

noloshayada masiixinnimo. Haddaba waa in mid garataan, waxaana weeye inaanan xooggeenna ku awoodaynin nolosha masiixinnimo, markaana waxaan u baahan nahay inaan garanno in Masiixu yahay geedka canabka, innaguna aynu nahay laamihii.

Waxaa markaa ina aawoodsiinaya nolosha masiixinnimo hal maaddo: Waana inaan geedka canabka ku dhex jirno. Markii aynu geedka canabka ka mid nahay waxaynu bilaabaynaa inaynu miro dhalinno. Masiixu wuxuu leeyahay sida ku qoran Injiilka Yooxanaa u qoray 15:4 sidatan: "Igu jira anna aan idinku jiree, sida laanta keligeed aanay miro u dhali karin, haddaanay geedka canabka ah ku oolin, sidaasoo kale idinkuna ma dhali kartaan, haddaydnaan igu jirin. Waxaa qoraha warqaddan Cibraaniyadda uu leeyahay sida ku qoran aayadda 6aad: **"Oo dabadeedna dhacay, ma suurtowdo in loo cusboonaysiiyo toobadkeenidda. Iyagoo mar kale Wilka Ilaah iskutallaabta isugu qodbaya oo bayaan u ceebaynaya."**

Kan aan ka midka ahayn geedka canabka suurtagal maahan in toobadda lagu soo duwo, waayo isagu awoodi maayo inuu ku noolaado nolol masiixinnimo oo taam ah. Waxaa suuragal ah in qaarkood ay calool jilicsan yihiin, oo mararka qaar ay ilmeeyaan, ha yeeshee haddana kuma dhex jiraan geedka canabka, oo laantoodiina waa la xooray, markaasay qalashay, oo waxaa lagu tuuray dabka.

Ha yeeshee badbaadadiisa uu ka helay Ciise Masiix qusayn mayso, laakiin waxay qusaysaa hawshiisii Masiixa uu u hayey oo waxay hawshu noqonaysaa tacab khasaaro, oo weliba kol dambe qofkaasi isaga ah la isticmaali maayo. Waayo waxaa qoraha Cibraaniyadu uu leeyahay: **"Ma suurtowdo in loo**

**cusboonaysiiyo toobadkeenidda, iyagoo mar kale Wiilka Ilaah iskutallaabta isugu qodbaya oo bayaan u ceebaynaya.**” Haddaba saaxiib, wakhti kasta oo adiga oo ah mid ka mid ah Muuminiinta, aad u dhaqmayso sida carruurta Shayddaanka, waxaad iskutallabta saaraysaa wiilka Ilaah, waayo wuxuu u yimid inuu ku siiyo furasho kaamil ah iyo inuu ku awoodsiiyo in Ruuxa Qodduuska ah uu noloshaada soo galo, iyo inaad isaga u noolaato. Isagoo qidcada sii wada ayuu wuxuu leeyahay sida ku qoran aayadda 7aad ee cutubkii lixaad sidatan:
“Waayo, dhulka cabbay roobka marar badan ku dul da’a , oo u soo saara geedo u wanaagsan kuwii beeray, wuxuu Ilaah ka helaa barako.” Haddaba waxyaabaha nooga soo go’a beeraha waa barako xag Ilaah nooga timid, oo waxaa ka mid ah ‘Mooska, bambeelmada iyo cambaha’. Waa waxyaalo aad u macaan waxyaabaha dhulka ka soo go’a. Haddaba Qoraha Warqaddan Cibraaniyada ayaa waxaa uu leeyahay, sida ku qoran 6:8, sidatan:
“…**Laakiin waa sidee haddii dhulka uu dhalo, qodxan iyo Yamaarug? Wax tar ma leh oo habaar buu ku dhow yahay, ugu dambaystiina waa in la gubaa.**”
Haddaba erayga loo isticmaalo aayaddan 8aad ayaa wuxuu noqonayaa erayga ah ‘Waxtar ma leh’. Wixii aan waxtar lahayn waa wax la diiday. Eraygaas Giriig ahaan wuxuu noqonayaa Adokimos, waana isla eraygii rasuul Bawlos u isticmaalay markii uu la hadlayey rumaystayaashii reer Korintos sida ku qoran warqaddiisii kowaad 9:27, waxaa Qorniinku leeyahay sidatan:
“**Jidhkaygaan dhibaa, oo addoon ka dhigaa si markaan qaar kale oo aan Injiilka ku wacdiyo, aan qudhayda lay diidin.**” Markaa erayga diidmada ee

halkan ku jira wuxuu la micne yahay **'Waxtarla'aan'**, waa wax aan waxba taraynin, oo layska diiday, Giriig ahaanna wuxuu noqonayaa adokemos, oo macnuhu yahay **'wax aan la doonayn'.** Markaa Rasuul Bawlos wuxuu leeyahay markaan Masiixa ka hor muuqdo dooni maayo in lay diido, ama aan raalli layga noqon. Welibana dooni maayo in Masiixu igu yiraahdo, **'Hawshaadu waa tacab khasaaro oo hawshaadii iyo noloshaadii masiixinnimana iiguma aad markhaatifurin.'** Markaa saaxiibbayaal kuwiinna masiixiyiinta ah waa in noloshiinna laga arkaa Masiixa, haddii kale dhibaato ayaa imanaysa haddii Masiix a laga hor-muuqdo, oo waxaa idinku dhacaya waxyaabo aydnaan malaysanaynin. Haddaba dhegayso aayadda furaha u ah qidcadan laysku mari waayo, markay joogto tarjumadeeda, waxaana 6:9 ay leedahay:

**"Laakiin gacaliyayaalow, wax ka wanaagsan oo idinku saabsan ayaa lana aaminsiiyey iyo waxyaalaha badbaadada, in kastoo aannu sida u hadalnay."**

Qoraha warqaddan Cibraaniyada wuxuu leeyahay, markaad dhanka kale u dhigto, waxaa lay aaminsiiyey inaad Ilaah u noolaan kartaan, oo aydaan ciyaal ama carruur sii ahaanaynin xagga Masiixa, laakiin aad masiixa ku kori doontana. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaan imminka idiin akhrinaynaa aayadda 10aad ee cutubkan lixaad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, Ilaah ma xaqdarra, mana illoobo shuqullkiinna iyo jacaylka aad magiciisa u qabtaan, maxaa yeelay, qudduusiinta ayaad u adeegteen oo weli waad u adeegtaan."**

Waxaa aayaddaan lagu adkaynayaa in Ilaah aanu illaawin shuqulka iyo jacaylka magaciisa loo qabo, ha yeeshee taasi maahan waxa badbaadada keenay, haddiise lagu badbaadiyey Ilaah wuu kaa abaalmarinayaa shuqulka aad u hayso iyo weliba jacaylka aad magaciisa u qabtaan, inkastoo labadaasu aanay khusaynin badbaadada qofka, ama ayan shaqo ku lahayn, ayey ay haddana doorweyn ka ciyaarayaan nolosha qofka Ilaah rumaystay.
Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka lixaad, waxaanan imminka eegaynaa 6:11, waxaana Qorniinka uu leeyahay sidatan:
**"Oo annagu waxaannu jecel nahay in midkiin kastaa muujiyo dadaalkaas oo kale tan iyo hubaasha rajada ilaa ugu dambaysta."** Waxaannu innaga oo dhan u baahan nahay xaqaaq'iqaas inoogu qoran kitaabka, inaannu maqalno. Waxaana Qoruhu uu leeyahay haddii aad ku adkaysataan rumaysadkiinna wax waluba waa wanaagsanaanayaan, oo wax waliba oo kalena way iftiimayaan. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal kitaabkan, imminkana eegaynaa Warqadii loo qoray Cibraaniyada 6:12, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan: **"Inaydnaan caajisiin noqon laakiin aad noqotaan kuwo ku dayda kuwa rumaysadka iyo dulqaadashada ku dhexla ballamada."**
Sidaad arkaysaan Ilaah ballamo badan ayuu siinayaa kuwa rumaysan haddii aynu aaminnimo ku sugno isaga oo aynaan welwwelin. Weli waxaynu horey idiinku sii wadaynaa isla kitaabka Cibraaniyada 6aad, waxaanan imminka eegayaa aayadda 13aad waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

**"Markii Ilaah ballan u qaaday Ibraahim, isagoo mid ka weyn oo uu ku dhaarto aan haysan, ayuu isku dhaartay."**

Haddaba markii qofi Axdi qaadayo wuxuu ku dhaartaa mid isaga ka weyn, laakiin maaddaama Ilaah uu yahay kan qaadaya Axdiga, Isaga ayaa isku dhaartay, waayo mid isaga ka weynu ma jiro, waa markii uu Nebi Ibraahim siinayey ballanka. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaannu imminka eegaynaa dhegaystayaal 6:14, waxaana Qroniinka uu leeyahay sidatan:

**"Isagoo leh, Hubaal waan ku barakadayn doonaa, oo waan ku kordhin doonaa."**

Haddaba ballamadii uu Ilaah siiyey nebi Ibraahim waxay ku qoran yihiin kitaabka Bilowgii 22-15-18, iyo kitaabka Cibraaniyada 11:19. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaa waxaa ku qoran aayadda 15aad ee isla cutubkan sidatans oo socota:

**"Oo sidaas isagoo u dulqaadanaya ayuu helay wixii loo ballan qaaday."**

Waxaa inta laynoogu sheegayaa arrin ahmiyaddiisu ay sarrayso, waxaana weeye in nebi Ibraahim uu muujiyey dulqaad, wuxuuna hubaashaasi ku helay rumaysadkiisi. Markii aad Ilaah ku kalsoonaato isaga ayaad la soconaysaa dhegyastoow, waxaanad ku koraysaa nimcadiisa iyo garashadiisa adigoo baranaya hadalkiisa inoogu qoran kitaabka Qodduuska ah.

Haddaba markii aynu sidaas yeelno waxaannu soo istaagaynaa ama gaaraynaa maqaam ka sarreeya kan aan Ilaah rumaysnayn. Weli waxaannu ku jirnaa kitaabka Cibraaniyada 6:16, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

**"Waayo, dadku waxay ku dhaartaan kan iyaga ka weyn, oo waxaa muran kasta oo kooda ah ugu dambaysa dhaar si loo xaqiiqaysto."**
Waxaannu garanaynaa in markii qofka uu dhaarto in muranka uu soo dhammaado. Haddii dadku ay is-qabtaan oo la kala saari waayo mid baa lagu dhaariyaa waxa uu aaminsan yahay, oo kutub baa gacanta loo geliyaa wuuna dhaartaa, murankiina halkaasuu ku soo dhammaanayaa. Haddaan horey idiinku sii wadno Qorniinka, oo aannu eegno imminka Warqadda loo qoray Cibraaniyada 6:17, waxaa qoran sidatan:
**"Sidaas daraaddeed, Ilaah, isagoo aad u doonaya inuu kuwa ballanka dhaxla tuso taladiisa aan beddelmi karin, ayuu dhaar ku galay…"**
Haddaba markii Ilaah arrin uu sameeyo uma baahna inuu dhaarto, laakiin haddana Axdi buu galaa oo noloshiisa ayuu ku dhaartaa markii uu arrin dadka u caddaynayo kaasoo ahmiyad weyn u leh dadka. Haddaan markaasi horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriskan ayaannu imminka eegaynaa 6:18, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:
**"In laba waxyaalood oo aan beddelmi karin, oo aan suurtoobin inuu Ilaah been ka sheego, aynu ku helno dhiirranaan xoog leh innagoo magangal u soo cararnay si aynu u qabsanno rajada ina hor taal."**
Waxaa halkan kore laynoogu sheegayaa inay jiraan laba waxyaabood ee aan beddelmi karin. Haddaba waa maxay labadaas waxyaabood ee aan beddelmi karin? Waxaa Ilaah uu ka ballanqaaday nebi Ibraahim inuu siinayo ubad ka badan xiddigaha cirka iyo camuudda badda taalla xeebteeda sida ku qoran kitaabka Bilowgii 15:4-5.

Mar kale ayuu haddana ku sii adkeeyey ballankiisii oo uu siiyey Axdi kale, sida ku qoran kitaabka Bilowgii 22:16-18 isagoo horey u haystay ballan aan isbeddelayn ayuu haddana nebi Ibraahim haddana helay Axdi kale. Labadaas ballan ee Ilaah siiyey nebi Ibraahim ayuu ka helay qalbi-qaboojin iyo farxad.

Bale maxay innaga labadaas Axdi maanta inoo tarayaan? Haddaba maahan oo kaliya inaan leennahay ballankii nebi Ibraahim la siiyey oo kale, laakiin waxaannu leennahay ama layna siiyey muujinno ku saabsan jacaylka Ilaah iyo hadiyadda wiilkiisa:

(1) Waana ballanka aynu ku helnay dhimashada iyo sarakiciddii Masiixa

(2) Sama-aadistiisii iyo inuu imminka fadhiyo gacata midig oo Ilaah isagoo ducooyinkeenna gaarsiinaya Ilaah. Waa laba ballan oo aanisbeddeli karin. Marka ay sidaasi tahay, haddii labadii ballan ee nebi Ibraahim la siiyey lagu daro labadan ballan ee aynu kor ku soo xusnay ayey hubaashu noqonaysa aafar goor, waana ballamo caaqibo leh oo aynu isku halayn karno. Wuxuu Qoraha Cibraaniyadu leeyahay, **"Aynu ku helno dhiirranaan xoog leh innagoo magangal u soo cararnay si aynu u qabsanno rajada ina hor taal.**"

Erayga magangal ayaa wuxuu I xusuusinayaa magaalooyinka ay reer binu Israa'iil lahaan jireen, oo ay dadku magangal ahaan ugu carari jireen markii ay qof si kama ah u dilaan sid aku qora kitaabka Tirintii cutubka 35aad iyo kitaabka Sharciga Ku Noqoshadiisa cutubka 19aad, iyo kitaabka Yashuuca cutubyada 20-21.

Waxaa magaalooyinkaasi magangalka ay masaal u ahaayeen sida Masiixu dembiileyaasha ugu ahaan doono meel ay dhimashada kaga gabbadaan. Marka la eego xeerkii hore ee reer binu Israa'iil, waxay ahayd qofkii qof kama' u dila ee ku soo carara magaalooyinkii magangalka loo sameeyey in qofkaas isaga aah aanu magaalada ka bixi karin ilaa wadaadka Sare ee xukumaya reer binu Israa'iil uu dhinto. Haddii wadaadku uu dhallinyaro yahay, waa inuu sugo ilaa iyo konton sannadood ama in ka badan.

Waxay markaasi taasi tilmaan ka bixinaysaa in Masiixu yahay magangalkeenna. Saaxiib dacwad baa laygu helay oo waxaan ahay dembiile, haddaba eeddii aan falay waxay u qalantaa dhimasho. Welibana xukunkii waa lagu dhawaaqay. Ha yeeshee Masiixa ayaa eeddaydii bixiyey, waayo isagu wuxuu u dhintay aniga iyo adiga daraadeen, oo anigu xor baan ahayn maanta. Waxaana layga samatabixiyey ciqaabtii dembiga, oo kol dambena layma weyddiin doono, waxaanan imminka xor u ahay inaan Masiixa u adeego oo waxaan leeyahay wadaad Sare oo ah Badbaadiyihii dhimashada ka sara kacay, oo anigu aan aadi karo.

Taasina waxay sawir caaqibo leh ka bixinaysaa hawsha Masiixu u hayo masiixiyiinta. Rasul Bawlos oo isla arrinkaas ka hadlaya ayaa wuxuu ku leeyahay reer Korintos sida ku qoran I Warqaddii kowaad 10:11 oo leh:

**"Waxyaalahaasi waxay iyaga ugu dhaceen masaal ahaan, oo waxaa loo qoray in laynagu waaniyo innagoo wakhtiyada dhammaatinkoodii ina soo gaadhay."**

SONG: REEL----CUT------

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin